

Filimka cimiladda > Tallaabooyinka

Waxtarka leh

Baaxadu inta ay leegtahay saamaynta beddesha cimiladdu yeelan doontaa, waxay si wayn ugu xidhantahay inta ay leegtahay inta aynu jarno ee kaarboonka baxaya ee gaaska greenhouse. Ugu horayn ka hor wax walba, waa in aynu u beddelnaa wax soo saarka tamarta oo aad cimiladda ugu wanaagsan oo aynu u isticmaalo tamarta si aad ugu waxtar badan. Waa in aynu adeegsanaa teknoolaji la isticmaalay oo la tijaabiyay, horumarinaa teknoolaji cusub, aan ka fekernaa tallaabooyinka si wanaagsan u shaqyasa, oo aynu ku faafinaa teknoolajiga xadadka wadanka. Tallaabooyinka cimiladda ilaa xad wayn waxay ku saabsanaan doonaan siyaasada. Isla markaana, inta badan way fududahay in masuulayada u wareejinaa "nidaamka". Markaan waxaan dareenaa in loo cudur daaray sii wadista in la qaato qaab la mid ah sidii hore; dhammaanba ka dib, ka qayb qaadasahdayadu waa dhibic badwayn ku dhacday. Si kastaba ha ahaatee isticmaalka wax soo saarka, kulayliska qoyska, gaadiidka ilaa dugsigga iyo shaqada. Safaradda fasaxyada iyo qashin qubka sidoo kale waa walxo muhiim ah oo sawrka ah. Maxaad samayn kartaa si aad ugu noolaato cimilo aad uu soo dhowayn badan?

Waajibaadyada la dhammaystirayo ka hor inta aanad daawan filimka

1. Bixi tusaalaha mashruuca yarayn kara kaarboonka baxaya ee CO₂.
2. Maxaad shakhsi ahaan samayn kartaa si aad u yarayso kaarboonka baxaya ee CO₂?

Waajibaadyada la xidhiidha filimka

1. Bixi labba tusaale oo wadamada uu qofkiiba isticmaalo tamar badan, iyo labba tusaale oo qofkiiba uu isticmaalo tamarta ugu yar. Sababtee ayaad ugu malaynaysaa wadamadan in ay leeyihiin heerar kala duwan oo isticmaalka tamarta ah?
2. Norway waxay siidaysaa 8.9 tan oo mitir oo CO₂ qoka degen sanadkiiba, marka tirooyinka lagu dabaqo wadanka Iswiidhan ay gaadho 5 tan oo mitir. Sababtee ayay kaarboonka baxaya CO₂ ee Norway uga baddan tahay Iswiidhan?
3. Sidee ayaynu ku beddeli karnaa isticmaalkeena tamarta sidaasna waxaynu ku yaraynaa kaarboonka baxaya CO₂?
4. Sharax mabda' ugu muhiimsan sida shayga yareeya falaadhaha qoraxdu u shaqeeyo.

5. Sababtee ayaa cilmi baadhida shayga yareeya falaadhaha qoraxda ay u noqon karaan ka qayb qaadashada yaraynta kaarboonka baxaya ee CO₂?
6. Xaga Mongstad sababtee ayaa saynisyahanada cilmi baadhidu ay kala shaqanaynayaa qabashadda kaarboobka iyo kaydinta (CCS). Caqabadahee ayaa la xalilayaa ka hor inta aan teknoolajigan la isticmaalin?
7. Tallaabooyinkee ayaad sidii qof caadi ah u fulin kartaa gudaha maalinta caadiga ah?
8. Sidee ayaad saamayn ugu yeelan kartaa go'aamada siyaasadeed ee horumariya mashaariicda si loo yareeyo CO₂?

Waajibaadyada la sii xoojiyay

1. Sharax sida qashin qubista iyo inta qashinku leegyahay maalintan iyo cimriga ay u yihiin heerarka sare u kacaya ee kaarboonka baxaya ee CO₂..
2. Tallaabooyinkee qashin qubka ah iyo yaraynta inta uu qashinku leegyahay ayay wax ku biirin kartaa yaraynta kaarboonka baxaya ee CO₂?
3. Bal ka feker in dhammaan qoysaska Norway looga baahanyahay in ay yareeyaan gaadiidkooda gawaadhida gaarka ah 50 %. Cawaaqibkee ayay tani kugu yeelan kartaa adiga ?